## Sidee baa ilmaha loo caawin Karaa si uu si fiican ugu hadlo?

**Ha u fiirsan siduu** ilmuhu u hadlayo, ee waxaad u fiirsataa **wuxuu ku hadlayo**. Ilmuhu xumaan buu dareemayaa, haddii hadalka laga kala gooyo. Adigu ha u hadlin ilmaha, ee isaga u ogolow inuu hadalkiisa dhammaysto. Ilmaha hadalkiisa ha sixin.

Adigu si deggan ahow. Haddii ay ilmaha ku timaado xaalad haghago adag u keeneysa, fiiri ilmaha indhihiisa.

Ilmaha ula hadal si deggan oo aan degdeg lahayn. Intaadan ilmaha u jawaabin ka hor, nasasho yar qaado. Sidaas baad ku dhimi kartaa degdeg dareemidda. Ilmaha kula hadal weedho fudud oo la fahmi karo. Halkii mar hal wax oo keliya weydii.

Xaaladaha hadalka ka dhig kuwo deggan. Demi waxyaabaha ay ka imaanayaan codadka dheeraadka ah ee aan loo baahnayn, sida telefishanka iyo raadiyaha oo kale. Ilmaha hadalkiisu markuu si fiican u socdo, fursad u sii inuu wax badan hadlo.

Ilmuhu markuu aad u haghagayo, la hees oo wax iskula luuqeeya. Markaas oo kale ilmaha wax badan ha weydiin.

Ilmaha haghagada leh waxaad ula dhaqantaa si la mid ah sidaad ula dhaqanto carruurta kale. Ilmaha haghagada leh ha u ogolaan inuu sameeyo waxyaabo aadan carruurta kale u ogolayn. Ilmaha haghagada leh laftiisa bar inuu dhegeysto dadka kale markay hadlayaan oo aanu hadalka ka dhexgelin.

## Faahfaahin dheeraad ah

Wixii faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan haghagada, terabiga hadalka iyo koorsooyinka waxaad ka heleysaa rugta daryeelka hooyada iyo dhallaanka, terabiistaha hadalka ee degmada aad deggen tahay, Ururka Haghagayaasha ee Finland iyo Ururka Midowga Terabiistayaasha Hadalka ee Finland.

**www.ankytys.fi**
**info@ankytys.fi**

RAY TUKEE
ray
RAY STÖDER

Print Mill Oy, 2010 - SOMALI

# HAGHAGO

## Warar ku saabsan haghagada ilmaha yar

SÄY

Ururka Haghagayaasha ee Finland

***Qoraalkani waa mid si fudud loo fahmi karo. Qoraalkan waxaa loogu talagalay carruurta yar yar ee haghagada leh waalidkood iyo dadka carruurta haya iyo ehelka kale.***

Ku soo celcelinta erayadu ma aha mar walba haghago. Waxaa dhici karta inuu ilamaha yar isagoo aan ugu talogelin uu marar badan ku soo celceliyo eray ama erayga bilowgiisa. Sidaasina badanaa way dhacdaa oo waa wax caadi ah.

Haghago waxay jirtaa, hadduu ilmuhu marar aad u badan oo wakhti dheer ah ku soo celceliyo eray ama erayo. Waxaa dhici karta inuu ilmuhu ku soo celceliyo erayga qayb ka mid ah, qaybtaasina waxay noqon kartaa xitaa qayb erayga dhexdiisa ah. Ilmuhu hadduu haghago leeyahay waxaa laga yaabaa inuu markuu hadlayo dhawaaqyada qaar jiido. Waxaa iyana dhici karta, in hadalka oo dhan uu xoogaa ku go'o.

## Warar ku saabsan haghagada

- Sababo badan oo kala duwan baa haghagada keena. Hadda waxaaba la aamminsan yahay, inay carruurtu sidooduba u nugul yihiin haghago yeelashada. Ilmaha deegaankiisu saamayn buu ku yeeshaa, inuu ilmuhu haghago bilaabo. Haghagada in loo nuglaado inta badan ehelkuna way isu gudbiyaan.
- Haghagadu wax ku talagal loo sameeyo ma aha. Ilmuhu markuu haghagayo, haghagadu ma aha wax uu ogaan u samaynayo.
- Da'o badan oo kala duwan bay haghagadu ku bilaami kartaa. Haghagadu badanaa waxay bilaabantaa, markuu ilmuhu barto inuu laba eray is daba dhigo. Haghagada ilmuhu wakhti dambe xitaa way bilaami kartaa, oo ilmuhu isagoo da'da iskuulka ah bay haghago ku bilaami kartaa. Qofka haghagada leh wuxuu heli karaa baxnaanin lagaga caawinayo haghagada. Baxnaaninta marka la kaashado, dadka haghagada leh badankoodu iyagoon weli da'da qaangaadhka gaadhin bay bartaan inay si fiican u hadlaan.
- Wiilasha iyo gabdhaha haghagadu waxay ku badan tahay wiilasha.
- Haghagadu waxay kaloo wadan kartaa dhaqdhaqaaqyo dheeraad ah, sida indhaha oo la isku qabqabto ama madaxa oo sameeya dhaqdhaqaayo sidii wax la gujinayo oo kale ah. Codkuna kor buu u qaadmi karaa.
- Ilmaha yar haghagadiisu caddad ahaan iyo tayo ahaanba way isbedbedeli kartaa. Waxaa dhici karta inuu ilmuhu xaalado gaar ah ku haghago. Waxaa iyana dhici karta in haghagiddu wakhti dheer socoto, xitaa waxaa dhici karta inay haghagiddu mararka qaar joogsato oo haddana dib u bilaabanto.
- Carruurta qaar baan iyagu mar walba dareemin haghagadooda. Qaarna waxaa dhici karta, in markuu hadalku si fiican ugu hagaagi waayo ay ka xumaadaan oo cidhiidhi dareemaan.

## Daryeelka haghagada

Ilmaha haghagada leh hadalkiisa in badan oo ka mid ah ayaa fiican. Sida ugu fiican ee ilmaha loo caawin karaa waa in ilmaha la dhiirigeliyo oo la taageero mararka uu sida fiican u hadlayo.

Waxaa fiican in loo fiirsado, xaaladaha uu ilmuhu sida aadka ah hadalka ugu fiican yahay. Ilmaha ma waxaa u fiican oo caawiya xaaladaha aan degdegga lahayn ee qofka weyn uu hayo wakhti uu ilmaha ku dhegeysto? Ilmuhu ma wuxuu si fiican u hadlaa, markuu helo inuu hadlo iyadoo aan sanqadh kale jirin? Ilmaha hadalkiisu ma wuxuu fiican yahay, markuu qofka weyn u hadlo si aan degdeg ahayn? Ilmaha miyey u fududaanaysaa, hadduu qofka weyn ku hadlo weedho fudud?

Hadday haghagadu socotey in ka badan sannad badhkii, waxaa fiican in caawimo laga doonto terabiistaha hadalka. Hadday astaamaha cilladda ee haghagadu yihiin kuwo aad u waaweyn, waxaa fiican in caawimada la raadsado wakhti hore.

Iyadoo la kaashanayo dheeldheelid iyo tababarasho ayaa terabiga haghagada lagu xoojiyaa siduu hadalku u noqon lahaa mid si fiican u socda. Carruurta yar yar waalidkood way ka qaybqaataan terabiga.Terabiga hadalka ayey waalidku ku bartaan habab la isticimaali karo wakhtiyada caadiga ah ee maalin walba. Waxaa iyana muhiim ah in dadka kale ee waaweyn ee ilmaha hayaa ogaadaan siday u caawin karaan, inuu ilmuhu si fiican ugu hadlo.

Way fiican tahay in ilmaha lagala sheekaysto haghagada. Hadduu ilmuhu ka xumaado haghagada uu leeyahay, waxaa aad muhiim u ah in isaga laga wada hadlo haghagada. Cod leh dejin baa ilmaha lagula hadlaa, marka lagala hadlayo haghagada. Marka haghagada sawir laga bixinayo waa in la isticimaalaa erayo uu ilmuhu fahmayo. Tusaale ahaan, ilmaha waxaa lagu odhan karaa "erayada ayaa soo boodboodaya". Waxaa iyana fiican in dadka kale ee ilmaha ehelkiisa ah ama u dhow si qalbi furnaan leh loogala hadlo ilmaha haghagadiisa.

Carruurta haghagada leh qoysaskooda waxaa loo qabanqaabiyaa koorso tababar oo la qabsasho ah. Waalidka iyo carruurtu waxay koorsada kula kulmaan qoysas kale oo iyaguna leh carruur haghago leh. Koorsada waxaa kaloo lagula sheekaysan karaa dad aqoonyahanno ah. Tababarro hadalka ah baa iyana ka mid ah koorsada barnaamijkeeda.

SÄY
Suomen änkyttäjien yhdistys